

Xusuus qor ku saabsan kaalmada Kharashka Sidda §§ 1835, 1835a buuga xeerka Madaniga ah ee daryeelayaasha iskaa wax u qabso lab iyo Dhedig¹

Daryeelka wuxuu guud ahaan noqonayaa mid lacag la'aan ah (Iskaa wax u qabso ah). Daryeele/yeelad ahaan dabcan waxaad awooddaa inaad wixii qarash ah ee kaa galo, wixii kaaga boxo fulinta hawsha lagu idmaday, lagu celiyo

1. Mag-dhaw loo bixiyo si isku duuduub ah § 1835a Buuga Xeerka Madaniga (BGB)

Mag-dhawga sidda ku cad § 1835a Buuga Xeerka Madaniga (BGB) haatan wuxuu yahay isagoo isku duuduub ah 399,00 € Sanadkiiba. Siddaa hadaad qarashkaasi ku doonaxysid, **uma baahnid** inaad Maxkamadda Waaxda arintaasi qaabilso (Maxkamadda Qoyska ama Maxkamadda daryeelka inaad caddayn kordhigidid

Lacag-celinta wuxuu imaanayaa sanad walba mar, marka kowaad waa marka uu sanadka Daryeelista la dalbaday. Waxaa laguugu wargalinayaa inuu sheegashadda Magdhawga isku duuduubka ah ee sidda loo qoondeeyay burayaa hadaadan marwalba codsiga illaa 31.03. sanadka xiga ku soo gudbin weysid. Waxay ku saabsan tahay **xiliga loo qabtay idlaansha** lagu soo gudbin karo, wixii cudadaasi ka dambeeyna loo yeelan doono xuquuq lagu dalban karo.

Miisaal:

Sanadka daryeelidda wuxuu dhamaanayaa 15.08.2009. Codsiga waxaa lagu soo gudbin karaa illaa 31.03.2010.

Foomka Codsiga waxaad helaysaa, marka aad soo weydiisatid. Codsiga waxaa loo soo qori karaa oo kale, isagoo qaab lahayn.

2. Bedelka qarash ucelinta, § 1835 Buuga Xeerka Madaniga (BGB)

Hadduu qarashka Magdhawyadda ka bato 399,- €, waa inaad si hufan oo kala dhig dhigan ku soo cadaysaa (Maalin booqashadda, Qarashka Gadiidka, Telefoonadii la diray, caddaynta boostadda oo ku cad cinwaanadda loo diray, iyo wax la mid ah). Hadaad Baabuurkaagii ku safartid, waxaad xisaabsanaysaa 0,30 Kilometer saacadii aad socotay, ayaad leedahay

Xaq u yeelashadda badeelka qarshyadda oo mid mid loo bixiyay wuxuu burayaa, hadaan inta u dhexaysa 15 Bilood marka qarashyadaasi la galay loogu keenti waayo qofka ay qusayso ama Maxkamadda Waaxda u qaabilsan (Maxkamadda Qoyska amaba Maxkamadda Daryeelka) looga dalban waayo.

3. Xuquuqda Doorashadda

Waxaa la awooddaa in si isku duuduub ah – aan lahayn Caddayn kali kali ah – **ama** bixinta qarashyadii baxay ayaa la codsan karaa. Doorro midka adiga kuu dan aha oo Kaduwan. **Wixii aad dooratid ayaa soconaya.**

4. Nidaamka Qarash celinta

Hadduu qofka ay qusayso yahay **qof aan waxba haysanin** diihaalsan oo sabool ah, daqliga joogtadda ah ee soo galana uu ka hooseeyo Heerka Gargaarka Bulshada iyo asaga/iyadda oo maal lahayn, kaa soo ka badan hantidda inta loo ogolyahay, markaad dalbatid qarashyadii kaa baxay waxaa lagaa siinayaa Qasnadda Gobolka.

Hantidda inta la ogolyahay waxay noqonaysaa sidda caadada tahay 5.000 €:

¹ Xasuus-qorkan wuxuu si isku mid ah u quseeyaa xataa Masuulka iyo Daryeeladda iyo sidoo kale Daryeelaha

Hadduu qofka ay arinta qusayso leeyahay daqli ku filan ama **maal** uu leeyahay, waxaad awooddaa inaad magdhawgaagii oo wata caddaymo mid mid ah (eeg kor 2) **adigoon codsi qoranin** ayaad durbadiiba marka qarashka la galo lagala bixi karaa Maalka qofka ay arinta qusayso. Hadaad dooratay qaabka Magdhawga ee isku duuduubka ah (eeg kor 1), waxaad awoodda inaad marka uu dhamaado sanadka daryeelidda aad kala baxdid qofka ay arinta qusayso maalkiisa. Dib u eegidda wuxuu ku imaanayaa marka uu yimaado Xisaabinta ama Warbixinta la soo bandhigo.

5. Waajibka canshuurta

Magdhawga sidda isku duuduubka ah lagu siinayo sidda caadada tahay ma aha in canshuur laga bixiyo. Waajibka canshuurta Daqliga wuxuu dabcan imaan karaa, marka aad dad ka badan ilaa lix La daryeelayaal aad daryeelayid iyo meelo kalana daqli kaa soo galaan, sidda shaqaale noqoshadda, wixii kaa soo galo. Warbixino tafatiran oo intaa dhaafsiisan waxaad fadlan kala xiriirtaa Maamulka maaliyadda ee ku qaabilsan.